This page was exported from - Laashin Iyo Hal abuur
Export date: Sun Feb 18 20:09:10 2018 / +0000 GMT

MAANSADA: DHAB-KA-HADAL Curiye: Kunciil Qorrax



MAANSADA: DHAB-KA-HADAL1- Kala dhigan ayaamuhu2- Kala dhidibsan waayuhu3- Adduun dheelmad weeyaan4- Naftu dhimasho weeyaan5- Dhaayo aragti weeyaan6- Dhagna taagan weligeed,7- Ruux walbaba dhaliishiis8- Ama dhaqan ammaantiis9- Haddii dhabarka loo suro10- Miyeey ceebi dhalan leyd?11- Haddii dhowrsi jiri laa12- Alle loo dhowaan laa13- Aakhiro la dhugan laa14- Dadka dhoohanee lumay15- Cadaab miyuu ku dhici laa?16- Haddaan Dhudiba sharaftiyo17- Dhaqankeeda dhigi layn 18- Miyaa dheef shisheeyuhu19- Soo dhigay banaannada20- Dhuunteenna mari layd?21- Haddaan qaranku dhici leyn22- Dhigyo udub la noqon laa23- Sharna loo dhowaan layn 24- Maatida la dhibi layn25- Miyuu dhicisku talin laa?26- Afartaa dhardhaar adag27- Oon dhariga saariyo28- Dhuuni kii la cuni laa29- Dhadhan kiisa wacaniyo30- Dheef iyo nafaqa iyo31- Maka dhigay ujeeddada32- Been lama dhiteeyee33- Dhab-kahadalka maansiyo34- Aan hoos u dhaadhaco35- Kala dhigo dhambaallada.36- Inta madax dhagxumo jacel37- Xilka dheegga loo suri38- Walle dhalasho guul iyo39- Inaan dhiirranaan socod40- Dhulka nabad ku joognaa41- Waa habeenki dheelmaday42- Adoo dheeha kuu dihan 43- Dhaaydeeda heli kara44- Dhado subax timaaddiyo45- Dhal-dhalaalka aan jirin 46- Halla raacin dhaayaha47- Haku dhumin sidii hore48- Kolleey dhagax la tuuraa49- Meel la'aan ma dhacayee50- Intaan hadalku kaa dhicin 51- Inaad dhowrsataa roon52- If waa laba dharaarood53- Midaad maanta dhaaddiyo54- Dhimman qayb ah weeyaan55- Mana dhimato taariikh 56- Haddii meel la dhigo abid57- Ruux adi dhiggaagaa58- Yuu ku dhaafin waligaa,59- Iney guushu dhalataa60- Dhaqaaq bey ku xirantee61- Ha is dhigane soo dhici62- Dhug u yeelo waayaha63- Dhaayaha fur waligaa64- Tusmo-dhicis ha noqonine,65- Hanka ruux ka dhaawacan66- Marna guul ma dhaliyee67- Dad waxaad ku dhaaftood68- Dhiggaa kaga sarreysaa69- Diintood ku dhaqantiyo70- Dhiirranaanta weeyaan,71- Dhiifnidu hub weeyee72- Ha is-dhiibbin waligaa73- Ha u dhiman sidii ruux74- Horay nolasha uga dhacay!75- Laba dhalasho hooyiyo 76- Dhiiggaba wadaageey77- Kala geeysay dheeftuye78- Haddaad ruux wax dheer tahay79- Haku dhowran baahida,80- Murti dhumuc lahaa tiri:81- Qofka adiga kaa dhacay82- Ruux buu ku dheer yahay83- Xurmadiinna dhaba iyo84- Isku dheeridiinniyo 85- Xiriirkaa dhamaadaye86- Dhaqdhaaqa ruuxdiyo87- Ma dhamaan naftiisii 88- Haddaad ceeb ku dhoobtana89- Waa kuu dhag-xumo uun,90- Si kastood dhibaatiyo 91- Dhakafaar u daristaan92- Dharaar waxaa ku soo mari93- Aad Dheeha maashide94- Samir kaasho waa dhabe.95- Dhowr shillin nin haystow96- Kolleey waad ka dhimanoo97- Luxud kuu ma dhigantee98- Qofka dhuubmay gaajada99- Bal dhankiisa soo eeg,100- Mid baa dhimir xanuunkii101- Dhoobada ku seexdoo102- Mid baa fooqyo dhaadheer103- Dhacadiida hooskoo104- Ku daliiqa dheeylada105- Dharag-daacsigiisuna106- Gadan yahay dhaqaaloo107- Aan dhugan hareeraha108- Misna Waxa ku dhinac sugan109- Midaan dhuuni deeqiyo110- Helin dheef ku filanoo111- Aan dharabba loo hayn,112- Dhacdo weeye baahdoo113- Kolleey sharafu dhimatoo114- Dhaqan beylah noqoyoo115- Laga dhaadhac samahee116- Ta dhimmani waxay tahay117- Ruuxdoo la dheelmiyo118- Dadkoo dhiirri galay oo 119- Dhidirrada sideed nool,120- Dharaaraha gudbee tagay121- Dhib ku dhaafay weeyee122- Hala raacin dhaayaha123- Midda dhalatay faallee124- Dhugmo iyo haddii aad125- Dhiifooni leedahay,126- Adoon taada dhicin karin127- Ha dhaliilin ruux kale 128- Ha u dhuran sidii doqon 129- Iyo dhuuni raacyada,130- U dhawow qofkii jacel 131- Dhanka horumarkaagoo132- Ha dhoweysan waligaa133- Qofka adi dhibkaagiyo134- Jacel kala dhantaalkaa,135- Qofka dhimirka laga galay136- Adoo dhinaca qaban kara137- Ha ku eegin dhaayaha138- Ha ku dhaafin hawl adag,139- Adoo qaranka dhicin kara140- Inuu dhaco gar maahee141- Ha u quurin dhiiqada142- Ha u dhiibin cadawgoo143- Dhac-dhac iyo hunguri iyo144- Ha ku iibsan dhowr shilin.145- Afartaa dhigaalkiyo 146- Waa dheegga hadalkee147- Dhugadoow ha sii deyn148- Dhug u yeelo saaxiib 149- Oo yaanay kaa dhumin,150- Maansada dhaliil iyo151- Ha u arag dhaleecee152- Erayada dhadhamayiyo153- Dheecaanka miiddaa154- Gacmahaaga uga dhuro155- Beryo aad ku dhaaftide,156- Afar kale dhawaaq iyo157- Dhabta hadalka loo yiri158- Ayaan kuu dhex galiyee159- Sida dhigo isugu qabo160- Oo dheelli ka ogoow,161- Dhaqan weeye dhaantadu162- Rati dhinac u dheelshana163- Loo ma dhuujin caynkee164- Curad kaaga dhacay ceel 165- Habaar loo dhitayn waa,166- Aan dhammeeyo arartee167- Hadal iyo dhammaantii168- Warku waxuu u dhacayaa169- Dhambaalkayga hadalkuna170- Dhidibkiisu uu yahay171- Ha dhageysan dhugufyada.172- Waxaad dhiig ku leedahay173- Kuna tahay nin dhiirrada174- Waa dhulkaaga hooyee175- Ha ka dhoofin

waligaa,176- Halaqiyo dhurwaayada177- Dhaxantiyo dabeylaha178- Badda dhumacda weyn iyo179- Mowjadaha is dhalan roga 180- Yaaney dhiigga kaa shuban,181- Ma gafuhu nin dhaqan liyo182- Maaha ruux wax dhiciyee183- Dhowrka shiline hooyadu184- Usoo dhidida maandhow185- Nin dhiteysta weeyoo 186- Dheefkala ma heystee 187- Hanku dhicis ha noqonine 188- Hooyadaa dhibka udiid,189- Dhaqan waxaad u leedahay190- Yaanu dhoofku kaa dhumin191- Iskamaada dhalanine 192- Dib udhugo waxaad tahay.193- Nafta dhiirri mooyee194- Ha is dhiibin waligaa195- Dhabbahaaga nololeed196- Dhanna ha uga leexane197- Guushaada soo dhici,198- Dhagahaagu yey maqal199- Hadallada dhunkaashaa200- Dhaayahaagu yey arag201- Dhagxumadiyo ceebtee202- Ka dheerow xumaatada.203- Ninka dheemmantiisiyo204- Dheehadoow lahaa iyo205- Dhaqankiisi dhigayoow206- Dhaawac dhidibsanbaa tee207- Dhaqtarrada xaggood qabo,208- Nin walalki dhiiboow 209- Kaa dhimay damiirkoo210- Dhoohane ayaa tee211- Iska dhimo adoo nool!212- Ninka dhinac u seexdee213- Ineey guul u dhalatoo214- Dheefsada sugaayoow215- Adna ruux dhantaalmoo216- Dhalanteed ku nool iyo217- Lax dhukaan qabtaa tahay!!218- Qaraxyada dhacaayiyo219- Dhibta yaa inoo dhigay?220- Dhaqan guurku waa maxay?221- Maxaa dhiiga shacabkaan222- Dhulka loogu qubayaa?223- Anigoon ku dheeraan 224- Biyo dhacu halkuu yahay225- Hadaan hoos u sii dhigo226- Waa dhiga qabiilkoo 227- Qarannimada dheefsada,228- Dhayal ha u maleeynine229- Abwaan dhiirran baa yiri 230- Barkin lagu dhareeriyo 231- Hurdo aad dhan ula taal232- Wax ku dheefi mayside233- Dheeree hankaagoo234- Cadawgaa hubka u dhuro,235- Hankaagoo dhaqaaqaa236- Guul kuu dhaweeyee237- Ha is dhiibin waligaa238- Hadduu cadawgu dhamac yahay239- Adiguna dhimbilo noqo!240- Dhabka hadalka maansada241- Aan soo dhammeeyee 242- Mindi dhiliqsan ruuxii243- Hilib inuu ku dhila raba244- Silic iyo dhib mooyee245- Sahal ugu dhambaliwaa,246- Waxaa taa ka dhiganoon247- Dhacarteeda maalnaa 248- Shacabkeenna dhuurigu 249- Dhudhummada ka galayee250- Dhurdihiyo qaniinkuna 251- Dhurdarrada u qooleen252- Bal may dhirif daraadii 253- Mar ka dhiidhiyaanoo 254- Dhololsiga qabiilkiyo255- Kala dhimashadeenaba256- Dhab maa looga xaaloo 257- Xeer dhidibbo adag loo258- Dhanged iyo sidii diir259- Aan kala dhacayn abid260- Maruun dhidibka loo mudo.Dhammaad.Curiye: Kunciil Qorax